

Suurat Al-Buruuj

سُورَةُ الْبُرُوجِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Samada Xiddigaha leh (iyo jidadkooda).

وَالسَّمَاءِ ذَاتِ الْبُرُوجِ ﴿١﴾

2. Iyo Maalinta laysu yaboohay (qiyaamada).

وَالْيَوْمِ الْمَوْعُودِ ﴿٢﴾

3. Iyo Dadka joogsan Maalintaas iyo waxyaalaha iman Maalintaas.

وَشَاهِدٍ وَمَشْهُودٍ ﴿٣﴾

4. Ee Lacnadi ha ku dhacdo kuwii Godka lahaa (Mu'miniinta lagu caddibo).

فَلْيَأْصَعِبِ الْآخِذُونَ ﴿٤﴾

5. Ee ahaa Naar olal (iyo shidaal) leh.

النَّارِ ذَاتِ الْوُفُودِ ﴿٥﴾

6. Gaaladiina ay korfadhiyeen Godka.

إِذْ هَرَعَلَيْهَا قُوعُودٌ ﴿٦﴾

7. iyagoo daawan waxa lagu fali Mu'miniinta « oo Jirraabaad ah».

وَهُمْ عَلَى مَا يَفْعَلُونَ بِالْمُؤْمِنِينَ شُهُودٌ ﴿٧﴾

8. Waxay ku neceen Dadkaasna ma jiro oon ahayn inay rumeeyeen Eebaha adkaada ee la mahadiyo.

وَمَا نَقَمُوا مِنْهُمْ إِلَّا أَنْ يُؤْمِنُوا بِاللَّهِ

الْعَزِيزِ الْحَمِيدِ ﴿٨﴾

9. Ee leh Samada iyo Dhulka xukunkooda, Eebana wax walba wuu u jeedaa.

الَّذِي لَهُ مَلِكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ

وَاللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ شَهِيدٌ ﴿٩﴾

10. Kuwa Mu'miniinta Rag iyo Haweenba jirraaba haddana aan tawbadkeenin waxay mudan Caddibaadda Jahannamo iyo caddibaad gubi.

إِنَّ الَّذِينَ فَتَنُوا الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ فَمَا كَفَرُوا بِمَا

كَفَرُوا بِهِمْ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٠﴾

Suuraddani waa Suurad wayn oo la yaableh kana qisoona inay jirtay in nin xun oo Gaal ah xukumi jiray dad, haseyeeshee Dadkii qaarkiis ay xaqa rumeeyeen, markaas uu faray ciidammadiisii in God Dab lagu shido, Ruuxii Diinta ka bixi waayana lagu tuuro, isaga iyo Colkiisiina ay daawanayeen, haseyeeshee Mu'miniintii xaqibay ku sugnaa-deen si kastoo loo caddibay, taasina waxay ku tusin ku sugnaanta xaqa iyo adkaysiga si kastoo dhib kuu soo qaabilo. Al-Buruuj (1-10).

11. Kuwa xaqa rumeeyey Camal-fiicanna falay waxay mudan Jannooyin ay dureeri dhexdeeda Wabiyaal, taa-sina waa liibaan wayn.

إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَهُمْ جَنَّاتٌ
تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ ذَلِكَ الْفَوْزُ الْكَبِيرُ ﴿١١﴾

12. Qabashada Eebana (Ciqaabtiisu) way darantahay.

إِنَّ بَطْشَ رَبِّكَ لَشَدِيدٌ ﴿١٢﴾

13. Eebe isagaa khalqiga ahaysiiyay soona celin.

إِنَّهُ هُوَ بَدِيعُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ ﴿١٣﴾

14. Waana dambidhaaf badane jecel (kuwa addeeca).

وَهُوَ الْغَفُورُ الْوَدُودُ ﴿١٤﴾

15. Carshiga sharafta lahma isagaa iska leh.

ذُو الْعَرْشِ الْمَجِيدُ ﴿١٥﴾

16. Wuuna falaa wuxuu doono.

فَعَالٌ لَمَّا يُرِيدُ ﴿١٦﴾

17. Ma ku soo gaadhay warkii Ju-nuuddii (Gaaladii).

هَلْ أُنَبِّئُكَ حَدِيثُ الْجُنُودِ ﴿١٧﴾

18. Fircoon iyo Thamuud.

فِرْعَوْنَ وَتَمُودَ ﴿١٨﴾

19. Hase yeeshee kuwii Gaaloobay waxay ku suganyihiin beenin (xaqa).

بَلِ الَّذِينَ كَفَرُوا فِي تَكْذِيبٍ ﴿١٩﴾

20. Eebana waa koobay (kamana baxsadaan).

وَاللَّهُ مِنْ وَرَائِهِمْ مُحِيطٌ ﴿٢٠﴾

21. Waase Quraan sharaf leh.

بَلْ هُوَ قَوْلٌ مَن مَّجِيدٌ ﴿٢١﴾

22. Oo ku Qoran Ioox la dhawray (looxulmaxfuudka).

فِي لَوْحٍ مَّحْفُوظٍ ﴿٢٢﴾

Kuwa xaqa rumeeyay oo Camal fiican fala Janno iyo wanaagbaa u dambeeya waana liibaan wayn, Eebana wuxuu doonuu sameeyaa, waana awood waynyahay, Gaaladii iyo xaq-diidayaashiina waa kii ciqaabay, Waxay Gaaladu beeninna waa uun Quraan sharaf leh oo la dhawray.

Xasan Albisri wuxuu yidhi: Quraanka sharafta leh wuxuu ku suganyahay Eeba Agtiisa Looxul-maxfuudka, wuxuuna ka soo dajin wuxuu doono, kuna dajin cidduu doono oo khalqigiisa ah. Al-Buruuj (11-22).